Having difficulty paying your water charges? SOMALI

Dhibaato ma kaa haysaa bixinta kharashyada biyaha?

Ma u baahan tahay inaad fahamto arintan?

Buug-yarahan waxaa lagu heli karaa luqadaha soo socda:

- Shiinaha (tan dhaqanka)
- Talyaaniga
- Fiyatnaamka
- Carabiga
- Beershiyaanka
- Faransiiska
- Soomaaliga
- Kureeshiyaanka
- Isbaanishka
- Indonuusiyaanka

Fadlan naga soo wac **13 13 85** si aad u codsato koobi. Haddii luqadda aad doonayso aysan ku jirin waxaan ku siin karnaa inaad lacag la'aan ku hesho Adeegga Tafsiirka iyo Turjumidda.

Macaamiisha ay hayaan baahiyo gaar ah macluumaadkan waxay ku heli karaan qaabab kale. Fadlan naga soo wac **13 13 85** si aad codsi u samaysato.

Waan garawsanahay inay mararka qaarkood adag tahay in lagu bixiyo akoonka watigeedii

Taasi waa sababta aan u samaynay ikhtiyaarada lacag-bixinta ee kala duwan kuwaas oo lagu aadin karo si ay u kafeeyaan baahiyahaaga.

Anagoo wadajir u wada-shaqaynayna waxaan heli karnaa xal.

Ma kugu adag tahay inaad codsato caawimaad?

Wakiiladayada Adeegga Macaamiisha iyo Maamulayaasha Kaysaska ayaa loo tababaray inay noqdaan kuwo xasaasi ah oo wax taageera.

Waxaan ku kalsoonahay in kooxdayada ay mar kasta wax ka qabanayaan codsigaaga si qarsoodinimo ah iyo si caddaallad iyo naxariis leh.

Dhibaato ma kaa haysaa bixinta kharashka?

Waxaan kuula macaamilaynaa si xasaasiyad leh oo ku salaysan kiisba kiis.

Waxaad xaq u leedahay inaad:

- Hesho macluumaad iyo talooyin ku saabsan ikhtiyaaradayada lacag-bixinta ee kala duwan iyo hababka jira.
- U magacaabato akoonkaaga in si lacag la'aan ah loogu diro cid saddexaad ama cinwaanka boostada ee kale.
- Hesho adeegga turjumaanka luqadda oo lacag la'aan ah.
- Ku hesho macluumaadka qaabab kale marka aad codsato kaas oo lacag la'aan ah.
- Hesho macluumaadka tashiilka biyaha kaas oo kaa caawin kara maaraynta/yaraynta isticmaalka biyaha ee mustaqbalka.
- Hesho macluumaadka ku saabsan wax-ka-dhimista ay dowladdu maalgeliso iyo mashruucyada caawimaadda dhaqaale sida Mashruuca Deeqda Adeegyada Dhibaatada (Hardship Utility Grant Scheme).
- Hesho macluumaadka ku saabsan Qorshaha Dhibaatada Dhaqaale (Financial Hardship Policy) iyo Mashruuca Caawimaadda Biyaha (Water Assist scheme).
- Kala doorato hababka lacag bixinta kala duwan ayadoo la raacayo duruufahaaga iyo awoodaada lacag bixineed.
- Hesho macluumaad qoraal ah ee habka heshiiska. Kaasna waxaa laguu soo dirayaa laba maalmood oo shaqo gudahooda laga bilaabo marka heshiiska la galo.
- Kala xaajooto xaddiga lacag bixintaada haddii ay jiraan wax isbaddal ah oo ku dhaca duruufahaaga.
- Laguu diro adeegga La-talinta oo lacag la'aan ah si aad u hesho talooyin madax bannaan. Inta muddadaas lagu jiro tallaabooyinka lacag soo-celinta way joogsanayaan taas oo ku xiran samaynta hab lacag-bixineed lagu heshiiyey.
- Lagaa ilaaliyo wixii tallaabo lacag soo-celin ah iyo kharashyada la xiriira markaad ogolaato aadna samaysato habka lacag-bixinta oo habboon. Waxaad kaloo xaq u leedahay qiyaasta dulsaarka ee la yareeyey.
- Laguula soo taliyo si qoraal ah in tallaabadii lacag soo-celinta ay sii socon doonto haddii aad ka soo bixi weydo inaad ilaaliso heshiiska lacag-bixintaada.

Waxaad u baahan tahay inaad samayso

- Sida ugu dhakhso badan noola soo xiriir markii ay kaa hortimaado dhibaato dhaqaale.
- Ogolow oo samayso heshiis lacag-bixineed oo habboon.
- Nala socodsii wixii isbaddal kasta ah oo ku dhaca duruufahaaga.
- Nala soo xiriir si aad u codsato heshiis kale haddii ay dhibaato kaa haysato sii wadidda qorshahii lagu heshiiyey.
- La xiriir la-taliye dhaqaale ama haya'dda wakiilka macaamiisha oo ku khuseeya haddii lagaa codsado. Taas waa adeeg lacag la'aan ah halkaas oo aad awoodi doonto inaad kala hadasho xaaladdaada si qarsoodinimo ah.

Ma u diiwaan gashan tahay inaad hesho lacag wax-ka-dhimis?

Haddii aad haysato Kaarka Howlgabka ama Kaarka Wax-ka-dhimista Dowlad-goboleedka, Kaarka Caafimaadka Ansiyaanada Federaalka oo uu la jiro Kaarka Ansiyaanada WA, Kaarka Ansiyaanada WA waxaad xaq u yeelan kartaa inaad hesho wax-ka-dhimis.

Fadlan ka eeg website-kayaga ah **www.watercorporation.com.au** ama naga soo wac **1300 659 951** si laguu diiwaangasho.

Ma tahay macaamiil ganacsade ah?

Waxaan garowsanahay in macaamiisha ganacsiga mararka qaarkood ay la kulmaan dhibaatooyinka xagga lacagta caddaanka ah. Haddii aad ku jirto xaaladdaas oo kale fadlan nala soo xiriir sida ugu dhakhsaha badan.

Waxaad codsan kartaa:

- Dib-u-dhigidda lacag-bixinta oo muddo gaaban ah.
- Qorshaha lacag bixinta oo ku salaysan heshiis iyo shuruudo macquul ah.

Ma tahay Kireyste?

Haddii aad tahay kireyste ay hayso dhibaato dhaqaale waa inaad u sheegtaa wakiilkaaga ama milkiilaha gurigaaga sida ugu dhakhsaha badan. Wakiilkaaga ama milkiilaha gurigaaga ayaa nala soo xiriiraya si aan isula ogolaano heshiis lacag-bixineed anagoo ku matalayna. Qiyaasta dulsaarka oo la yareeyey ayaa lagu saari karaa.

Waxaan kaloo kaa siin karnaa caawimaad iyo macluumaad hababka aad ku noqon karto Biyo-dhaqaaleeye.

Gurigaaga ma mid la kireystey baa?

Anagoo ah adeeg loo qabto milkiilayaasha guryaha waxaan siinaa akoon wakiilka ama kireystaha marka la soo codsado.

Si kasta ha ahaatee, tani ma saamaynayso ka masuulnimadaada kharashyada. Markii loo diro akoonka qof aan adiga ahayn ayadoo aan la bixin markii mudadii la gaaro, tallaabada lacag soo-celinta ayaa bilaabanaysa.

Haddii ay ku hayso dhibaatooyinka lacag-bixineed fadlan nala soo xiriir si loo sameeyo heshiis lacag-bixineed oo habboon. Qiyaasta dulsaarka oo la yareeyey ayaa lagu saari karaa.

Maxay tahay dhibaato dhaqaale?

Dhibaato dhaqaale waxay sheegaysaa dhibaato ka hortimaada shakhsiyaadka ama qoysaska kuwaas oo la halgamaya inay bixiyaan kharashyadooda nolol-maalmeedka caadiga ah oo ay ka mid tahay cuntada, daynta guriga, akoonka korontada iwm.

Haddii bixinta kharashyada biyahaaga ay saamaynayaan awooddaada inaad bixiso kharashyadii nolosha waxaa laguu qaadanayaa inaad ku jirto dhibaato dhaqaale.

Macaamiisha qaarkood tan waxay u noqon kartaa xaalad ku-meel-gaar ah oo ay ugu wacan tahay;

- Wax degdeg ah oo aan la filayn
- Yarayn ku-meel-gaar ah ee xagga dakhliga
- Isbaddal degdeg ah ee ka jira duruufaha nolosha

Macaamiisha kale, waxaa laga yaabaa inay tahay xaalad muddo dheer. Tan waxay ku dhici kartaa dadka hela dakhliyada hooseeya ama go'an kuwaas oo u baahan kara caawimaad joogto ah.

Waxaad ka eegi kartaa koobiga **Qorshahayaga Dhibaatada Dhaqaale (Financial Hardship Policy)** www.watercorporation.com.au ama Naga soo wac **13 13 85** si aad koobi u codsato.

Haddii ay ku hayso dhibaato dhaqaale

Intaas taageerada ballaaran ah ee lagu soo sheegay buug-yarahan waxaa raaca inaan bixino:

- Heshiisyo lacag-bixineed oo aan dulsaar lahayn haddii aad ogolaato inaad samayso heshiiskaaga.

- Qorsheyaal lacag-bixino is-le'eg kuwaas oo kuu ogolaanaya inaad haftooyin isugu gayso kharashyada aan la bixin iyo kharashyada biyaha mustaqbalka ee la filayo.

In kastoo aad lacagta bixinaysey haddana weli dhibaato ma jirtaa?

- Waxaa laga yaabaa inaad u xaq leedahay **Mashruuca Caawimaadda Biyaha (Water Assist Scheme)**. Oo loogu talagalay macaamiisha ay hayaan dhibaatooyinka dhaqaale kuwaas oo u baahan heerar sare oo caawimaad ah, mashruucaas wuxuu macaamiisha ka caawiyaa inay kharashyada waqtigoodu dhacay dib ugu soo-celyaan meel la maarayn karo ayadoo la siinayo caawimaad ay lacagta ku bixiyaan.

- Ayadoo ku salaysan duruufahaaga shakhsiyadeed waxaan kuu diri karnaa adeegga la-talinta oo lacag la'aan ah oo aad ka hesho la-taliye tababaran.

Waxaan doonaynaa inaan war kaa helno

Waxaan dhiirigelinaa ra'yi-celinta. Waa dhaqankayaga inaan hubino adeegyada aan siino macaamiisha ay hayaan dhibaatooyinka dhaqaale inay yihiin kuwo macquul ah oo taageero leh.

Haddii aad jeceshay inaad bixiso ra'yi-celin ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan nala soo xiriir.

Sidaad noola soo xiriirayso

Weydiimaha akoonka (account enquiries) (8am ilaa 5pm maalmaha shaqadu jirto)
Naga soo wac **13 13 85**

TTY (Teleefanka teebka ah ee loogu talagalay macaamiisha qaba dhibaatooyinka dhago la'aanta ama hadal la'aanta)
Naga soo wac **13 36 77**

Si loo diyaariyo turjumaan
Naga soo wac **13 13 85**

Macluumaadkan waxaa lagu heli karaa qaabab kala duwan marka la soo codsado.

Email
customer@watercorporation.com.au

Boostada ugu soo dir
Water Corporation,
Locked Bag 2
Osborne Park Delivery Centre
WA 6916

www.watercorporation.com.au

ISBN 1740434927

November 2008

Waxaa lagu daabacay warqad xaashida beya'd ahaan u saaxiib ah